



Xog Muhiim ah oo ku saabsan Cuntooyinka Dugsiga Cunugaaga

Haddii uu cunug guriga kuu joogo kaasoo ku jira fasalka barbaarinta ilaa fasalka 12aad, u qalma cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban ee dugsiga, ugu yaraanna ku jira 5 maalmood oo xariir ah oo uu dhiganaayay waxbarashada oonleenta ah/fogaan barashada lagasoo bilaabo markii sanad dugsiyeedku bilawday, cunugaas wuxuu u qalma gunnooyin lagu bixinaayo barnaamijka Wareejinta Gunnada ee Elektarooniga ah (EBT).

Waa maxay gunooyinka cunugu heli doono?

Xaddiga lacagta gunnada waa \$5.86 cunug kasta maalin kasta oo uu ku jiro waxbarashada oonleenta ah/fogaan barashada oo soconaysa ugu yaraan 5 maalmood oo xariir ah bilaha Agoosto iyo Sibteembar 2020.

Cunugaygu ma u qalma haddii uu dhigto dugsi lagu dhigo waxbarashada isku dhafan ee oonleenta/fogaan barashada iyo tan tooska ah?

Cunugaagu waa u qalma ilaa inta uu u qalmo barnaamijka cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban, waxbarashada oonleenta ahna uu ku jiro ugu yaraan 5 maalmood oo xariir ah. Tusaale,

- » U qalma – hal asbuuc (5 maalmood oo xariir ah) oo waxbarashada oonleenta ah kaasoo uu ku xigay hal asbuuc oo waxbarashada tooska ah.
- » U qalma – Maalmaha Isniinta, Talaadada, Khamiista, Jimcada dhammaan ku jira waxbarashada oonleenta ah aana dhigan dugsiga maalinta Arbacada. Dugsi lama dhiganaayo gabi ahaanba (marka laga reebo maalmaha fasaxa) tirada ku jirta xisaabta 5 maalmood ee xariirka ah.
- » Aan u qalmin – Isniinta, Arbacada, Jimcada waxbarashada tooska ah, Talaadada, Khamiista waxbarashada oonleenta/ fogaanta ah dhigta.
- » Aan u qalmin – Dugsigu wuxuu leeyahay jadwalka AA BB, Kooxda A ayaa toos dugsiga u dhigata Isniin, Talaado iyo Kooxda B oo toos dugsiga u dhigata Khamiista, Jimcada.

Sidee ayaan u adeegsan karaa gunooyinka?

Gunooyinka waxaa loo adeegsan karaa in lagaga iibsado noocyada cuntada dukaanada raashinka/tafaariiqleyda aqbashaha Ohio Direction Card (Kaarka Adeegga ee Ohio) (oo sidoo kale loogu yeero kaarka EBT).

Haddii cunugu hadda qaato SNAP:

- » Marka la gaaro dhammaadka Sibteembar, gunooyinka P-EBT ayaa lagu dari karaa koontada ardaygu gunooyinka ku qaato.
- » Haddii aan ardayga la waafajin karin koontadiisa shaqaynaysa ee SNAP, waxaa lagu soo diri doonaa kaarka P-EBT oo magaca cunugaagu ku yaalo.

Haddii cunugu uusan hadda qaadan SNAP:

- » Marka la gaaro bartamaha Juun waxaad heli doontaa kaarka P-EBT oo gunnooyin cunto ka buuxaan kaasoo laguusoo dhigaayo boostada. Kaarka ayaa ku qornaan doona magaca cunuga, laguma qoraayo magaca waalidka ama masuulka. Tilmaamo ku aadan sida looga shaqaysiiyo kaarka ayaa lasoo raacin doonaa.

Su'aalo kasta oo ku saabsan u qalmida cunugaaga ama aadan helin gunnada, fadlan la xariir degmo dugsiyeedka cunugaaga.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto barnaamijka ama kaararka, fadlan la xariir 1-866-244-0071.